

Warqad casumaad ah

Ku soo dhowaada wadhadalki ugu horreeyay ee xannaanada carruurta

Ku socota waaliddiinta _____

Waxaan doonaynaa in aan idinku casunno wadhadalki ugu horreeyay ee ka dhaca halka xannaanada carruurta.

Waxaan doonaynaa in aan qoys ahaan idin baranno. Waxaad fursad u helaysaan in aad su'aalo na weydiisaan, waxaan kala caddayn karnaa waxyaalaha aan idinka filayno iyo kuwa aad naga filaysaan.

Waxaan jecel nahay in aad labadiinnuba wadhadalka u timaaddaan haddii ay taasi suurtaggal idiin tahay.

Taariikh: _____

Saacad: _____

Inta uu wadhadalku socdo waxaan ka hadli doonnaa mawduucyada hoose, waxaan doonaynaa in aad kuwan horey uga sii fikirtaan:

Sidee ayaa loo hubin karaa billowga ugu fiican ee suuraggalka ah ee xannaanada carruurta?

Qoyska ilmaha (shakhsiyaadka ilmaha muhiimka u ah)


Wakhtiga ugu horreeya (uurka, xilliga ilmuhu saqiirka yahay)

Korriinka ilmaha

Ammaan iyo isku-xirnaan

Waxyaalaha laga filayo xannaanada carruurta

Wixii layska kaashan karo?



Mahadsanidiin _____

WADAHADALKA BILLOWGA AH EE ILMAHA KU CUSUB XANNAANADA CARRUURTA

(wejiga 2-aad - waxaa qabanaya madaxa barbaarinta)

- Hadaf:** * In lays barto ilmaha iyo qoyska.
* La wadaago khibradihii billowga laga kororsaday.

Aad ayay ilmaha yaryar muhiim ugu tahay in billowga xannaanada carruurta sida ugu wanaagsan ee suuraggalka ah uu u noqdo carruurta, waalidka iyo shaqaalaha intaba.

Wakhtiga kulanka waalidka ayaa lagala heshiinayaa inta lagu jiro muddada billowga ah (ugu danbayn maalmaha ugu horreeya).

Taariikhda wadhadalka waalidka: Goorma ayuu ilmuhu billaabay:
Magaca ilmaha: Taariikh dhalasho:
Waalid (mas'uul):
Walaalo:
Yaa yimid wadhadalka:

DARYEEL GOOR HORE

Hadda ka hor ilmaha ma lagu daryeeli jiray meel guriga ka baxsan?	
Haddii haa: Sidee ayuu ilmuhu halkaas ula qabsaday?	
Sidee ayuu ilmuhu ula qabsaday dadka waaweyn?	
Sidee ayuu ilmuhu meesha uga helaa?	

XAALADDA QOYSKA

Yaa loo arkaa xubnaha qoyska ee ugu sokeeya? Hooyo, aabbe walaalaha, waalidka kuwii dhalay, waalidka kuwa ay is-qabaan iyo kuwaa carruurtooda?	
--	--

Ma jiraan dad uu ilmuhu si gaar ah ugu xiran yahay oo aan qoyska soke ahayn?	
Xaalado khaas ah oo guriga ka jira oo ay tahay in ay shaqaalaha xannaanada carruurta ogaadaan miyaa jira?	
Yuu ilmuhu la nool yahay? Haddii ay jirto: Yay saaran tahay mas'uuliyadda waalidnimo /daaryeelka maalmeed? Yaa loo baahan yahay in ay xannaanada carruurta warbixin siiso?	
Haddii aanay waalidku wada noolayn sidee ayay u qaybsadaan wakhtiyada ay ilmaha la joogaan? Yaa xannaanada carruurta u soo sheegaya wixii is-beddel ah?	

WAXYAALO ILMAHA KU SAABSAN - WAX ISUGU DUBARIDID BARAATIHO AH

Ilmahaaga/ilmihiiinna nooga sheeke. Ama: Sidee ayay waalidku ilmaha u arkaan? Isticmaal shan erey oo ilmahaaga sharraxaya! (sifo)	
DABEECADIHIISA CUNTADA (xannaanada carruurta ayaa cuntada ka sheekaynaysa - deeqda cuntada) Alleerjig? Wax gaar ah oo uu ilmuhu jecel yahay / wax aanu jeclayn? Ilmaha wax cuniddisu waa sidee? Ma jiraan waxyaalo ay waalidku dalbanayaan?	
HURDADA/NASASHADA Ilmuhu maalinti ma seexdaa, in intee le'eg ayuu seexdaa? Ilmuhu ma isticmaalaa boombale, cinjirka masaasadda caanaha ilmaha lagu siiyo	

<p>iwm?</p> <p>Ilmuhu ma u bartay in uu dibedda/gudaha seexdo?</p> <p>Waxyaalaha ay xannaanada carruurta/waalidku doonayaan ee la xiriira qalab iyo dhar la dhigo xannaanada carruurta?</p>	
<p>HAGAAJIN/ISTICMAALKA XAFAAYADDA</p> <p>Ilmuhu tuunji/musqul ma isticmaalaa?</p> <p>Ilmuhu ma u bartay wakhtiyo go'an oo wax la qabto?</p> <p>Ma jiraan waxyaalo ay waalidku dalbanayaan?</p>	
<p>FIRFIRCOONIDA/CAADOOYINKA</p> <p>Firfircoonida uu ilmuhu jecel yahay/aanu jeclayn.</p> <p>Hababka uu u fal celiyo? (eeg meesha looga hadlayo muujinta dareenka)</p>	
<p>LUUQADDA</p> <p>Ereyada iyo uraahda uu ilmuhu isticmaalo.</p> <p>Muxuu ilmuhu fahmaa, xaaladahee ayuuse gartaa? (Tusaale bixi)</p>	
<p>CAAFIMAAD</p> <p>Cudurro hore?</p> <p>Xeerarka taxaddarka ee xannaanada carruurta.</p> <p>Borogaraamka tallaalka ma la raacay?</p>	

WIXII LIFAAQ AH EE LA SOCDA CODSIGA XANNAANADA CARRUURTA

Waxaa qoray?	
Sabab:	

KU SAABSAN SANADKII KOOWAAD EE NOLOSHA ILMAHA

<p>Sidee ayaad u aragteen korriinka ilmaha?</p> <ul style="list-style-type: none"> - jir ahaan - bulsho ahaan - xagga madaxbannaanida marka la eego 	
<p>Sidee ayuu adiga/adinka iyo ilmaha xaalkaagu/xaalkiinnu ahaa?</p> <p>Dhacdooyin gaar ah oo la xiriiray in ilmo idiin dhasheen miyaa jiray?</p>	
<p>Uurku sidee buu ahaa?</p> <p>Muddadi u horreysay markaad ummushay kaddib sidee bay ahayd?</p>	
<p>Sidee loo qaybsaday wakhtigi fasaxa?</p>	
<p>Jirro intii ilmuhu yaraa?</p> <p>Khabiir takhasus leh ma la socday?</p> <p>Daaweyn?</p> <p>Dhibaato gaar ah oo xagga daawada ah hadda? (Eeg meesha looga hodlayo cuntada)</p>	
<p>WADASHAQAYNTA RUGTA CAAFIMAADKA</p> <p>Sheeg runta caafimaadka ee aad ku xiran tihiin.</p> <p>Ma jiraan wax ay rugta caafimaadku ilmaha kala shaqaysay?</p>	

KEENISTA/QAADISTA (xataa wejiga 3-aad)

<p>Sideed u aragtaan keenista iyo qaadista ilmaha ee xannaanada carruurta?</p>	
<p>Sidee ayay shaqaaluhu subixii idiin soo dhoweeyaan?</p>	
<p>Sideed u aragtaan in aad ilamaha uga tagtaan xannaanada carruurta? Yaa ilmaha ka kaxayn doona xannaanada carruurta?</p>	

Muxuu ilmuhu sameeyaa marka ay waalidku ka tagaan?	
Maxaan qaban karnaa si ay is-macsalaamayntu ugu dhacdo sida ugu wanaagsan ee suuraggalka ah?	

FIRFIRCOONI, CIYAAR IYO ISLA-QABSI - AMMAAN IYO DAREEN (xataa wejiga 3-aad)

Isla-qabsiga ilmaha - firfircooni nooc ee ah ayay waalidka iyo ilmuhu maalintii wada qabtaan?	
Ilmuhu calaamado toos ah ma bixiyaa - "ma fududdahay" in la fahmo waxa uu ilmuhu leeyahay/rabo? Ilmuhu baahidiisa ma sheegtaa? Dareen sidee ah ayuu ilmuhu maalintii isticmaalaa/muujiyaa? (niyadjab, farxad, cabsi, qajilaad, welwel iwm.)	
Sidee ayuu ilmuhu u muujiyaa in uu faraxsan/maqsuud yahay?	
Sidee ayuu noqdaa ilmuhu marka uu ku jiro xaalado ammaan ah iyo kuwo aan ammaan ahayn? Sidee ayuu noqdaa ilmuhu marka ay waalidku ka tagaan? Ilmuhu ma u bartay dad aanu aqoon? Ilmuhu ma u bartay in ay hayaan dad kale oo waaweyn? (saaxiibbo?) Maxaad samaysaa/samaysaan marka uu ilmuhu u baahan yahay in loo laabqaboojiyo? - marka aanu ammaan dareemayn?	
Ma jiraan wax uu ilmuhu ka baqayo ama wax kale oo ku adag?	

<p>Ma jiraan wax adiga/adinka dhib kugu/idinku ah?</p>	
--	--

WADASHAQAYN IYO WAXYAALAHA LA FILAYO

<p>Waxyaalaha kale aad u aragto/aragtaan in ay muhiim yihiin in laysku wargeliyo? (tusaale ahaan: caadooyin, dhaqan iwm.)</p>	
<p>WAXYAALAHA LA FILAYO Maxaa muhiim idiin ah in ay xannaanada carruurta ka taxaddarto? Maxaa muhiim u ah wadashaqaynta ka dhexaysa guriga iyo xannaanada carruurta?</p>	
<p>Dhererka maalmaha ilmuhu waa intee?</p>	
<p>Sidee ayaad u aragtay/aragteen wadahaadalka?</p>	

GABAGABO/SOO KOOBID
Mustaqbalka iyo waxa dhici doona

Saxiixa xannaanada carruurta

Saxiixa waalidka/mas'uulka ilmaha

Boggan inta la buuxbuuxiyo ayaa nuqul waalidka la siinayaa



KU _____

Ku soo soo dhowaada wadhadalka waalidka!

Wakhtiga:

FOOMKA QIIMAYNTA (wejiga 3-aad)

Foom su'aalo ah oo waalidka la siinayo dhawr maalmood wadhadalka ka hor.

Waalidka / dadka mas'uulka ka ah.....

Waxaa lagu casumayaa wadhadal la socosho ah maalinta.....

...../.....saacadda:

Waxaan doonaynaa in aad su'aalahaan horay uga sii fikirtaan oo aad ka jawaabtaan. Foomka waxaa la soo xaraynayaa ugu danbayn maalinta uu wadhadalku dhacayo.

Sidee ayay ahayd muddadi ugu horreysay xannaanada carruurta?	
Sidee ayaa laydiin qaabbilay? Ka warrama sidii aad u kala barateen kooxda shaqaalaha?	
Xiriir nooc ah ayaad la leedahay/leedihiin xiriiriyihiinna (primærkontakten) (haddii aad xiriir la leedihiin)?	
Dadka waaweyn ma yihiin kuwo ilmaha u heellan? Waa sidee keenidda iyo qaadista maalin walba?	
Warbixinno kugo/idinku filan ma ka heshaan xannaanada carruurta? Haddii aadan/aydnaan ka helin - maxaad tabaysaa/tabaysaan?	
Ka helidda iyo ammaanku waa muhiim - Sidee ayaad u aragtaa ka helidda iyo ammaanka ilmahaaga? Ilmuhu subixi isagoo ku faraxsan ma aadaa xannaanada carruurta?	
Baahida ilmaha wax ma laga qabtaa?	
Waa sidee nidaamka hurdada, wax cunidda iyo beddelidda xafaayadda?	

Warbixin kugu filan ma lagu siiyay intaan la furin xannaanada carruurta? Haddii aadan/aydnaan ka helin - maxaad tabaysaa/tabaysaan?	
Waxyaalo kale oo aad doonayso/doonaysaan in aad nala soo qaaddo/qaaddaan?	

WADAHADALKA WAALIDKA

SU' AALO KU SOCDA WAALIDKA DHAWRKA LUUQADOOD KU HADLA

FG! Haddii turjubaan loo baahan yahay sheeg wakhti fiican wadahadalka ka hor. Haddii aadan hubin, waxaa kuu fiican in aad turjubaan ballansato.

Magaca ilmaha: _____

Taariikh dhalasho: _____ **Ku dhashay:** _____

Turjubaan ma loo baahan yahay? Haa Maya

Luuqad/lahjad: _____

Magaca hooyada: _____ **Magaca aabbaha:** _____

Waddanka ay u dhalatay: _____ **Waddanka uu u dhashay:** _____

Taariikhda wadahadalka: _____

Goobjoog: _____

LLUQAD

1. Luuqadda hooyo/lahjadda hooyo			
2. Luuqadda hooyo/lahjadda aabbe			
3. Afafkani ma yihiin kuwo la qoro?			
4. Afkee ayay qoysku ilmaha kula hadlaan?			
Hooyo	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Aabbe	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Walaalo	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Qoyska intiisa kale	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
5. Afkee ayuu ilmuhu kula hadlaa ...?			
Hooyo	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Aabbe	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Walaalo	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:

Qoyska intiisa kale	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:
Saaxiibbo	Luuqad hooyo	Af-norwiiji	Af kale:

6. Hva heter følgende ord på deres morsmål?			
Velkommen!		Ja/Nei.	
God dag/Hei!		Jeg vil ikke.	
Adjø / Ha det!		Mamma	
Hva heter du?		Pappa	
Jeg heter		Jeg må på do.	
Jeg liker deg.		Jeg har tissa.	
Jeg er sulten.		Jeg har bæsja.	
Jeg er tørst.		1,2,3,4,5	
Er du trøtt?		Er du lei deg?	
7. Da'dee ayuu ilmuhu ku billaabay af-norwiijiga?			
8. Mararkee ayuu ilmuhu isticmaalaa af-norwiijiga?			
8B. Afkee ayaad adigu/adinku darentaa/dareentaan in uu ilmuhu inta ugu badan ku hadlo?			
9. Sidee ayaad u aragtaa/aragtaan aqoonta ilmaha ee afka hooyo marka loo eego ilmaha ay isku da'da yihiin?			
10. Sidee ayaad u aragtaa/aragtaan af-norwiijiga ilmaha?			
11. Ilmuhu ma leeyahay saaxiibbo ku hadla afkiisa hooyo?			
12. Ilmuhu ma leeyahay saaxiibbo ku hadla af-norwiiji?			
13. Ma jirtaa hees carruureed fudud oo aan baran karno oo luuqadda hooyo ee ilmaha ah?			

MARKI HORE IYO HADDA

<p>14. Xoogaa ka sheeg taariikhda qoyska adiga oo cuskanaya qodobbada soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Taariikh ka hor intaan Norway la imaan (korriinki – bey’adda ciyaarta, xaaladda degaanka, qoys, saaxiibbo, qaar kale dhacdooyin guriga ka dhacay, waxyaalo dhib ah haddii ay jiraan, waxyaalo murugo ku reebay oo uu ilmuhu la soo kulmay – FG! Dadka oo idil lama soo kulmin!) - Geeddi/qax (guurguurid, muddada la joogay meelaha kala duwan, meesha iyo haddii xero qaxooti muddadii halkaas la joogay) - Ilmuhu ma ku noolaan jiray dalka asal ahaan laga soo jeedo? Haddii uu ku noolaan jiray, muddo intee dhan? - Xaaladda wakhtigan xaadirka ah (xaaladda oggolaashada joogitaan (status), hoy, shaqo). Ma jiraan waxyaalo/xaalado aad aaminsan tahay/tihiin in ay kugu/idinku adag yihiin? 	
---	--

DHAQAN IYO DIIN

<p>15. Ma jiraan waxyaalo gaar ah oo loo baahan yahay in aan tixgelinno marka la eego diinta, dhaqanka ama caadooyinka?</p>	
<p>16. Maalmahee ayuu qoysku u dabbaaldega? Ma doonaysaan in kuwan xannaanada</p>	

<p>carruurta looga dabbaaldego, sidee ayaase loogu dabbaaldega? Wax gacan ah oo aad adinku arrintaas ka geysan kartaan ma jirtaa?</p>	
<p>17. Ma jiraan waxyaalo kale oo loo baahan yahay in aan tixgelinno / waxyaalo kale oo loo baahan yahay in aan ogaanno? Marka la eego raashin iyo dhar.</p>	
<p>18. Firfircoonida ka dhacda xannaanada carruurta ma ku jiraan qaar aanu ilmuhu ka qaybqaadan karin?</p>	

SOO KOOBID IYO MUSTAQBALKA WAXA DHICI DOONA

Goob/taariikh: Saxiixa mas’uulka wadahaadalka

Nuqulka boggan ayaa waalidka la siinayaa

LIISKA QALABKA (waxaa la qaybinayaa billowga)

Waa in aad wadataa:

- Quraac u gaar ah haddii aanu ilmuhu guriga ku soo quraacan - waxaa kale oo jira in xannaanooyinka carruuraha qaarkood carruurta laga siiyo cunto/cabbitaan, meesha qaar kale carruurta looga baahan yahay in ay dhammaan iyagu soo qaataan.
- Xafaayado
- Kareemka qorraxda/qabowga
- Kabaha gudaha lagu joogo
- Haddii uu ilmuhu ku seexanayo gaariga carruurta lagu riixo: suun, bustaha dhinacyada ka tolan ee carruurta la dhex geliyo (pose), bacda roobka, shandarawad.
- Haddii loo baahdo: boombale maro ah, cinjirka masaasadda caanaha ilmaha lagu siiyo, boombale iwm.
- Dharka hawada kala duwan
- Sarwaalka dheer ee hoosta laga gashado ee qaboobaha la qaato
- Sagsaan dhogor ka samaysan
- Sarwaal dhogor ka samaysan ama sarwaal layloon ah (fleecebukse)
- Funaanad dhogor ka samaysan ama mid layloon ka samaysan
- Buud dhaadheer oo goome ah
- Kabo xilliga lagu jiro ku habboon. Kabaha qaboobaha/kulaylaha
- Isku-joogga qaboobaha la gashado ama isku-joogga kulaylaha
- Sarwaal roob, jaakad roob
- Marada yar ee luqunta lagu duubto
- Koofiyaal (ku habboon hadba xilliga sanadka ee lagu jiro). Koofida qorraxda maalmaha ay qorraxdu kulushahay
- 2 joog oo gacmagashi ah

Boorsada dhar-beddelashada ee ilmaha waa in ay ku jiraan:

- Sarwaalka dheer ee hoosta laga gashado ee qaboobaha la qaato
- Sagsaan
- Funaanad gacmagaab ah /funaanadaha gudaha looga xiro carruurta
- Kastuumo/nigis
- Sarwaallo
- Funaanado kuwa dhaxanta ah